Iftin Charter School

Mawduuca: Nadaamyada Midaysan ee Dacwooyinka	Xeer #1000-13

Xeerka: (Policy)

Gudiga Maamulku waxuu aqoonsanyahay in iskuulku uu mas'uul ka yahay xaqiijinta in la raaco ama loo hogaansanaado dhammaan sharciyada iyo xeerarka gobolka iyo federaalkaba ee lagu maamulo barnaamijyada waxbarashada. Iskuulku waa in uu raacaa Nadaamyada Midaysan ee Dacwooyinka (Uniform Complaint Procedures) markii la soo jeedinayo cabashooyin eedeeynaya sharci daro ku saabsan kala takoorka, handadaad, hanjabaada ama booc-boocsiga kuna salaysan: da', isir, midab, aqoonsiga asal, muujinta jinsi, aqoonsiga jinsi, lab iyo dheddig, naafo, dhalashada, qowmiyad, diin, nooca xubinta taranka, ama qof xiriir la leh qof kale ama koox kale oo leh tilmaamahan dhabta mashruuc kasta amah awl kasta oo kaalmo ka hesha hayadaha dhaqaalaha bixiya ee gobolka.

Iskuulku waa in uu raacaa Nadaamyada Midaysan ee Dacwooyinka (Uniform Complaint Procedures) markii la soo jeedinayo cabashooyin eedeeynaya in lagu guul daraysto in loo hogaansanaada sharciga gobolka ama federaalka ee ku saabsan waxbarashada dadka waaweyn, barnaamijyada kaalmada ah ee heerka midaysan, waxbarashada soo galootiga, xirfadaha farsamo iyo barnaamijyada tababarka, barnaamijyada daryeelka iyo horumarinta dhallaanka, barnaamijyada nafaqada dhallaanka, barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo shuruudaha qorsheynta amniga ama badbaadada.

Iskuulku waa in uu raacaa Nadaamyada Midaysan ee Dacwooyinka (Uniform Complaint Procedures) markii la soo jeedinayo cabashooyinka heshiiskii laga gaaray Williams ee ku saabsanaa tabantii ama ku filaan la'aantii la xiriirtay qalabka waxbarashada, xaaladaha dhismayaasha oo aan loo dayactirin, loona kabin si hufan oo khatar la'aan ah, iyo maqnaanshaha macalimiinta'

Iskuulku waa in uu raacaa Nadaamyada Midaysan ee Dacwooyinka (Uniform Complaint Procedures) markii la soo jeedinayo cabashooyinka ku saabsan "khidmada ardayga" ee looga baahanyahay ka qaybgalka hawlaha waxbarasho ee ay bixiyaan iskuulada bulshada guud ee California, sida ku qeexan Qoddobka Sharciga Waxbarashadda California 49010.

Guddiga Maamulku waxuu u dhiirigaliyaa, in marka horaba, dacwooyinka loo xaliyo si caadi ah oo heer goobeed ah mar kasta oo ay suuragal tahay.

Marka la helo dacwo qoraal ah oo ka socoto shaqsi, hay'ad dawladeed, ama urur dadweyne, Nadaamyada Midaysan ee Dacwooyinka (Uniform Complaint Procedures) waa in la curiyo. Maamulahu waa in uu qaybiyo warbixin buuxda oo ku saabsan nidaamyadan

Guddiga wuxuu aqoonsanyahay dhexdhexaadiye dhexdhexaad ah in uu inta badan soo jeedin karo tanaasul ay aqbali karaan dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo. Iyadoo la raacayo nidaamka cabashada midaysan, mar kasta oo ay dhammaan dhinayada cabanaya ay isku dayaan in ay khilaafkooda dhexdhexaadin ku xaliyaan, maamulahu waa in uu bilaabaa geedi socodka dhexdhexaadinta ka hor bilaabida baaritaan rasmi ah. Maamulahu waa in uu hubiyaa in natiijooyinka dhexdhexaadintu ay yihiin kuwo waafaqsan sharciyada iyo xeerarka gobolka iyo federaalkaba.

Guddigau waxuu aqoonsanyahay oo xushmeesanyahay asturnaanta xuquuqda ardayga iyo shaqaalaha. cabashooyinka ku saabsan Takoorka waa in loo baaraa hanaan illaalinaya sirta iyo xaqiiqooyinka dhinacyada is khilaafsan. Tan waxaa ka mid ah in la ilaaliyo, oo aan shaaca laga qaadin aqoonsiga iyo sirta kan dacwoonaya marka laga reebo waxa lagama maarmaanka u ha in la fuliyo baaritaanka ama dacwada, hadba sida uu u go'aansado maamulaha iyadoo loo eegayo dacwa walba xaaladeeda.

Guddigu waxuu mamnuucayaa qaab kasta oo aar goosasho ah oo lagu la kaco dacwo buuxinta, xog-siinta siiba marka takoorka am aka qeyb qaadashada dacwada. Ka qeybqaadashada noocaan oo kale ah waa in aanay sinaba u saameeynin xaalada, darajada, ama meelaynta shaqada ee cabtaha.

Nadaamyada : (Procedures)

Saraakiisha Dacwada u xil saaran (Compliance Officers),

Guddigu waxuu magacaabaa saraakiisha loo dacwoodo is ay u qaabilaan oo u baaraan dacwooyinka una xaqiijiyaan in sida iskuulku dawada u qaadayo ay sharciga waafasantahay.

Amal Hersi, Maamule
Iftin Charter School
5465 El Cajon Blvd.
San Diego, CA 92115
(619)265-2411

Maamulahu waa in uu xaqiijiyaa in shaqaalaha loo xilsaarayo in ay baaraan dacwada ama cabashada ay yahiin kuwo aqoon u leh sharciga iyo barnaajmiyada ay mas'uulka ka yihiin. Shaqaalahaas iyaga ah waa in ay heli karaan la taliye sharci yaqaan ah (legal Counsel) oo uu go'aamiyo maamulaha ama sakaalka loo xilsaaray.

Ogeysiinada (Notifications)

Ogeysiiska kor ku xusan waa in ay ku cadahay in qofka dacwoonayo uu ka raadsan karo caawin hayadaha sida kuwa sharciga dadka ka caawiya, xarumaha dhexdhexaadinta maxliga ah, ama

xafiiska waxbarashada ee degmada. Meelaha aan fogayn ee aad xog ama waxqad dheeraad ah ka heli karto waxaa ka mid ah:

San Diego County Office of Education
6401 Linda Vista Rd
San Diego, CA 92111
(858)292-3500

Center for Social Advocacy
Phone: (619) 444-5700 or (800) 954-0441
Web site: http://www.c4sa.org
Email: info@c4sa.org

San Diego City Human Relations Commission
Phone: (619) 236-6420 Hours: M-F 8:00.a.m. - 5:00 p.m.
Web site: http://www.sandiego.gov/human-relations/

Nadaamyada (Procedures)

Habka soo socda waxaa loo isticmaali doonaa in wax laga qabto dhammaan cabashooyinka lagu eedaynayo in iskuulku uu ku xadgudbay sharciyada federaalka ama gobolka ama xeerarka hagayo barnaamijyada waxbarashada. saraakiisha loo xilsaaray dacwadu waa in ay sugaan diiwaan gelinta dacawo kasta iyo falalka xiga ee la xiriira.

Dhammaan Dhinacyada ay khusayso dacwooyinka waa in la ogeysiiyo goorta dacwada la xareeyay, goorta la balamiyey in dacwada la dhageysto iyo goorta go'aanka laga gaaray.

Tallaabada 1^{aad}: Xaraynta Dacwada (Filling of Complaint)

Shakhsi, hay'ad dawladeed ama urur kasta ayaa xaraysan kara dacwo qoraal ah oo lagu eedaynayo in iskuulku aanu sharciyada raacin.

Dacwooyinka ku taxaluqa takoorka ama kala sooca sharci darada ah waxaa xarayn kara qofkii tirsanaya in xadgudubkaas takoorka ah uu isaga si shakhsi ah u dhibaateeyay ama uu rumaysanyahay in sidoo kale la takooray shakhsiyaal kale oo isku sinji ah. Bilawga dacwadu waa in uusan ka dib dhicin lix bilood laga bilaabo taariikhda markii eedaynta takoorku dhacay ama markii ugu horaysay ee la ogaaday xaqiiqaha eedaynta dacwada takoorka ah.

Dacwada waa in loo keeno sarkaalka xeer ilaaliyaha ah kaas oo diiwaan geliya dacwooyinka la soo xareeyo, dacwo kastana ku tiimbareeyo taariikhda la soo xareeyay, siiyana lambnar baaq ah.

Haddii dacwooduhu uusan awaadin in uu dacwada qoraal ku gudbiyo curyaanimo ama aqoon darro awgeed, shaqaalaha iskuulka ayaa ka caawin kara si uu u xareeyo dacwada.

Tallaabada 2aad Dhexdhexaadinta (Mediation)

Dhexdhexaadinta Saddex beri gudahood dacwada la soo xareeyo, Sargaalka Xeer illaaliyaha waa in uu si aan rasmi ahayn (informal) ugala hadlo qofka dacwoonayo in ay suuragal tahay in la isticmaalo dhexdhexaadin. Haddii qofka dacwoonayo uu aqbalo dhexdhexaadinta, Sargaalka loo xilsaaray dacwada waa in uu sameeyaa qabanqaabooyinka habkan dhexdhexaadinta.

Ka hor inta aanan la bilaabin dhexdhexaadinta dacwootinka ku saabsan takoorka, Sargaalka u xilsaaran dacwadu waa in uu xaqiijiyaa in dhinacyada is dacweeynayo ay heshiis ku yihiin in qofka dhexdhexaadiyaha ah uu qeybka ka yahay xogaha sirta ah ee dacwada.

Haddii dhexdhexaadintu ay ku xallin weydo dhibaatada si sharciga waafaqsan, Sarkaalka loo xilsaaray dacwada waa in uu bilaabaa baaritaankiisa dacwada.

Dhexdhexaadintu waa in aysan dhaafin waqtiyada iskuulka u cayiman ee baaritaanka iyo xallinta dacwada haddii kale, waa in qofka dacwoonayo uu si qoraal ah ku aqbalaa in waqtiga la kordhiyo.

Tallaabada 3aad Baaritaanka Dacwada (Investigation of Complaint)

Marka la baarayo dacwo, Sargaalka u xilsaaran dacwada waa in uu shan maalmood gudahood laga soo bilaabo maalinkii dacwada la xareeyey ama dhexdhexaadinta lagu hishiin waayey uu ku qabto shir baaritaan. Shirkan waa in uu fursad u siiyaa qoka dacwoonayo ama wakiilka u ah in uu dacwadii si oraah ah ugu soo celiyo.

Qofka Dacwoonaya iyo/ama wakiilkiisa iyo iskuulka wakiilkiiladiisa waa in ay sidoo kale helaan fursad ay ku soo jeediyaan xogta la xiriirta dacwada. Dhinacyada is khilaafa waa in ay ka wada hadlaan dacwada ama su'aasha midba midka kale ama kuwa kasta makhraatiyadooda.

Tallaabada 4aad: Natiijada (Responcse)

Jawaabaha la helo 30 beri gudahood laga bilaabo marka dacwada la xareeyey, Sargaalka u xilsaaran dacwada waa in uu diyaariyo oo u diro qofka dacwoonaya qoraal warbixin ah oo ku saabsan baaanritaankii iyo go'aankii iskuulka, sida ku sharraxan Tallaabada #5 ee hoos ku qoran. Haddii qofka dacwoonayo uu ku qanci waayo go'aanka Sarkaalka dacwada loo xilsaaray, waa in uu shan maalmood gudahood uu dacwo qoraal ha u gudbiyo Guddiga (board).

Marka la baarayo dacwo, Sargaalka u xilsaaran dacwada waa in uu shan maalmood gudahood laga soo bilaabo maalinkii dacwada la xareeyey ama dhexdhexaadinta lagu hishiin waayey uu ku qabto shir baaritaan. Shirkan waa in uu fursad u siiyaa qoka dacwoonayo ama wakiilka u ah in uu dacwadii si oraah ah ugu soo celiyo. Guddigu waa in ay arrinta dacwada ku falaqeeyaan shirkooda joogtada ah ee xiga ama ay galaan shir aan caadi ahayn si aysan u dhaafin 60ka

maalmood ee loo cayimay in dacwada looga jawaabo. Waxaa laga yaabaa in Guddigu ay go'aansadaan in aysan dhegaysan dacwada, taas oo noqon karta in Sarkaalkii dacwada loo xilsaaray go'aankiisii uu yahay kama dambays.

Haddii Guddigu uu dhegaysto dacwada, Sarkaalka dacwada loo xilsaaray waa in uu u diro qofka dacwoonayo go'aankii Gudiga 60 maalmood gudahood laga bilaabo markii ugu horaysay ee dacwadu iskuulka soo gaartay ama waqti horay si qoraal ah loogula heshiiyey qofka dacwoonaya.

Tallabada 5^{aad} Go'aan qoraal ah oo kama dambays ah (Final Written Decision)

Warbixinta go'aanka iskuulka waa in lagu qoraa English iyo luqada qofka dacwoonayo markasta oo ay macquul tahay ama sharcigu u baahanyay. Haddii aysan suuragelayn in warbixinta lagu qoro luqada qofka dacwoonaya, Iskuulku waa in uu qabanqaabiyo kulan kaas oo qof bulshada ka mid ah uu u turjumi doono dacwada qofka soo dacwooday.

Warbixintan waxaa ka mid ah:

1. Natiijooyinka iyo qaabka dacwadu ku dhammaatay, ay ka mid yihiin falal sixitaan, haddii ay jiraan
2. Sababta qaabka dacwada ay ku dhammatay ee kor ku xusan.
3. Ogeysii lagu xusayo xuquuqda qofka dacwoonayo uu u leeyahay in uu rafcaan go'aanka ka dhan ah weydiisto Waxbarashada Gobolka California iyo hannaanada ama hababka la raacayo si loo bilaabo rafcaanka.
4. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan dhammaan arrimha gaarka ah ee la keenay illaa markii baaritaanku lagu gudo jiray iyo illaa xadka arrimahan la xaliyey.

   Haddii shaqaale la ganaaxo dacwad la soo dacweeyey awgeed, warbixintan waa in ay ku cadahay tallaabada laga qaaday iyo in qofkaa shaqaalaha ah uu iskuulku u sheego waxa laga filayo (expectations).

Rafcaanada loo gudbinayo Wabarashada Gobolka California.

Haddii qofka dacwoonayo uu ku qanci waayo go'aanka iskuulka, waa in uu qofkaasi qeexaa sababta ama sababaha uu rafcaanka uga qaadanayo go'aanka iskuulka waana in uu ku lifaaqaa nuqulka (a copy) dacwada iyo nuqulka go'aanka iskuulka.

Akhriska Koowaad:
Akhriska Labaad:
La hirgaliyey 5/32/2013